



**3-da Nofeembar, 2026
Doorashada Guud
Galalka Xogta
Codbixiyaasha Degmada
Multnomah
oo Soomaali ah**

Galalka Xogta Codbixiyaasha Degmada Multnomah 3-da Nofeembar, 2026, Doorashada Guud

Waxaa jira laba qaab oo aad kusoo celin karto Warqaddaada Codbixinta.

Kusoo celi Warqaddaada Codbixinta boostada adigoo adeegsanaya boqshadda soocelinta ee kharashka boostada la bixiyay, taasoo Calaamadda Boostada lagu dhuftay Maalinta Doorashada ama kahor; ama kusoo celi Warqaddaada Codbixinta Goobta Rasmiga ah ee Laga Rido Codbixinta ugu dambayn 8:00 p.m. Maalinta Doorashada ee 3-da Nofeembar, 2026.

Dhismaha Doorashooyinka Degmada Multnomah Duniway-Lovejoy (Multnomah County Duniway-Lovejoy Elections Building)

1040 SE Morrison Street
Portland, OR 97214

Xarunta Codbixinta Degdega ah (Voting Center Express)

(Ku dhex taala Dhismaha Bariga Degmada Multnomah (Multnomah County East Building))

600 NE 8th Street, Gresham, OR 97030

Waxay furan tahay 8-da Oktoobar – 3-da Nofeembar, 2026

Saacadaha caadiga ah: Isniin – Jimce

8:00 a.m. ilaa 5:00 p.m.

Telefoon: 503-988-VOTE (8683) 800-735-2900 (TTY)

MultnomahVotes.gov
elections@multco.us

Muddada kama dambaysta ah ee is-diiwaangelinta codbixiyaha

Isku diiwaan geli codbixinta ugu dambayn **Talaadada, 13-ka Oktoobar, 2026**. Haddii loo baahdo, cusboonaysii xogtaada diiwaangelinta codbixiyaha ama iska diiwaan gali si aad uga codeyso barta OregonVotes.gov/MyVote

Saamaynta Dhismaha

Goobta Rasmiga ah ee Laga Rido Codbixinta waxaa doorashadan saamaynaya xiritaanka maktabad dhisme ka socdo awgiis. Gudaha waxaad ka heli doontaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xiritaanka Goobta Rasmiga ah ee Laga Rido Codbixinta.

Galalka Xogta Codbixiyaasha Degmada Multnomah oo Ku qoran af Soomaali

Macluumaad Doorasho oo la isku halayn karo

Xusuusnow: Habka ugu wanaagsan ee codbixiyayaasha Degmada Multnomah ku heli karaan macluumaad doorasho oo lagu kalsoon yahay waa inay booqdaan barta webseedkeena ee MultnomahVotes.gov ama naga soo wacaan **503-988-VOTE (8683)**.



I sawir!

Sawir si aad u booqato webseedka Doorashooyinka Degmada Multnomah (Multnomah County Elections) oo aad u hesho ilo xogeedyo dheeraad ah.

Multco.us/elections



@MultCoElections



@MultCoElections



@MultnomahVotes

#MultnomahVotes

FADLAN OGOOW: Doorashooyinka Degmada Multnomah (Multnomah County Elections) waxay daabacdaa macluumaadka musharrixiinta iyo qodobbada loo codeynayo sidii loo soo gudbiyay. Ma saxno hinkaada, shaqallada, naxwaha, jumlada, ciladaha ama xogta khaldan.



Warqad Ku Socota Codbixiyaha

Codbixiyaha Degmada Multnomah ee qiimaha iyo qaayaha leh,

Qaybtaan ka midka ah Buug-yaraha Cod-bixiyayaashaada waxaa bixisa Laanta Doorashooyinka Degmada Multnomah (Multnomah County Elections). Waxa ku jira macluumaad ku saabsan musharrixiinta iyo qodobbada loo codeynayo ee ka socda maamullada maxalliga ah ee ku dhex yaal xuduudaha Degmada Multnomah. Galka Xogta Codbixiyaha ee Gobalka (oo ku yaal labada dhinac ee qaybtan, isla markaana daabacaad cas ku leh cidhifka bogga) waxa ku jira macluumaad ku saabsan musharrixiinta xilalka federaalka iyo gobalka.

Galkan Xogta Codbixiyaha ee Doorashada Guud ee 3-da Nofeembar, 2026 waxaa boostada loogu dirayaa dhammaan qoysaska deggan Degmada Multnomah.

Maadaama Galalka Xogta Codbixiyaha ee Gobalka iyo Degmaduba waaweyn yihiin, galalka si gooni-gooni ah ayaa boostada loogu dirayaa. Haddii aadan weli helin Galka Xogta Codbixiyaha ee Gobalka, filo inuu dhowaan boostada kuugu yimaado.

Waa kuwaan dhawr waxyaalood oo ay tahay inaad ogaato:

- Laga bilaabo Doorashadan Guud ee Nofeembar 2026, codbixiyayaasha Degmada Multnomah hadda waxay adeegsanayaan Codbixinta Dookhyada (Ranked Choice Voting RCV) si ay u doortaan dhammaan jagooyinka musharrixiinta Degmada Multnomah. Doorashadan, **codbixiyayaasha Degmada Multnomah waxay adeegsan doonaan RCV si ay u doortaan:** Guddoomiyaha Degmada, Guddoomiyaha District 2, Hanti-dhawraha Degmada, iyo Taliyaha Booliiska Degmada.
- Codbixiyayaasha Portland waxay bilaabeen adeegsiga RCV bishii Nofeembar 2024, wayna sii wadi doonaan si ay u doortaan jagooyinka musharrixiinta Magaalada Portland (City of Portland). Doorashadan, **codbixiyayaasha Magaalada Portland (City of Portland) waxay adeegsan doonaan RCV si ay u doortaan:** Hanti-dhawraha Magaalada, iyo Xubnaha Dawlada Hoose ee District 3 iyo District 4.
- Dhammaan tartannada musharrixiinta Degmada Multnomah iyo Magaalada Portland (City of Portland) ee adeegsanaya RCV waxaa lagu ururiyay bog gaar ah oo warqadda codbixinta ah. **Ha ilaawin inaad cod bixiso oo labada bog ee warqadda codbixinta kusoo celiso boqshaddaada soo-celinta.**
- Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Codbixinta Dookhyada, oo ay ku jiraan faahfaahinta sida loo calaamadiyo warqaddaada codbixinta, waxaad eegi kartaa boggeena Xaqiiqooyinka aad Ka Ogaanayso Codbixinta Dookhyada ama booqo, [Multco.us/rcv](https://multco.us/rcv).

Galalka Xogta Codbixiyaasha Degmada Multnomah oo Ku qoran af Soomaali

- Waxaad ka arki kartaa marxalada diiwaan gelintaada barta oregonvotes.gov/myvote. Waxaad sidoo kale boggaas ku cusboonaysiin kartaa diiwaangelintaada codbixiyaha ama kala socon kartaa warqaddaada codbixinta.
- **Muddada kama dambaysta ah ee Diiwaan Gelinta Codbixiyuhu waa 13-ka Oktoobar, 2026.**
- **Sanduuqa Rasmiga ah ee Codbixinta ee ku yaal Maktabadda Hillsdale (Hillsdale Library)** wuxuu ku yaal jidka lugta ee dhinaca waqooyi ee dhismaha inta ay maktabaddu u xiran tahay dhismaha socda awgiis. Waxaad ka eegi kartaa boggeena Goobaha Rasmiga ah ee Laga Rido Warqadda Codbixinta ee furan 24-ka Saacadood faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan sida loo soo celiyo warqaddaada codbixinta.
- **M&M Dhaqidda Gawaarida (M&M Carwash)/Regal Cinemas Tiyaatarka (Regal Cinemas) (SE Division iyo 165th Ave.) hadda ma aha goob rasmi ah oo laga rido warqadda codbixinta.** Doorashooyinku waxay ka shaqaynayaan inay xaafaddan ka hirgeliyaan Goobta Rasmiga ah oo cusub oo Laga rido Warqadda Codbixinta. Inta ka horreysa, Maktabadda Rockwood (Rockwood Library) (17917 SE Stark St.) ayaa ah Goobta Rasmiga ah ee Laga Rido Warqadda Codbixinta ee furan ee ugu dhow. Si aad u hesho liiska Goobaha Rasmiga ah ee Laga Rido Warqadda Codbixinta ee Degmada Multnomah, fadlan booqo webseedkeena: [Multco.us/DropSites](https://multco.us/DropSites).
- **Warqadaha codbixinta waxaa la bilaabi doonaa in boostada lagu diro Arbacada, 14-ka Oktoobar, 2026.** Haddii aadan helin warqaddaada codbixinta ugu dambayn Khamiista, 22-ka Oktoobar, 2026, fadlan wac 503-988-VOTE (8683) ama iimayl u dir, elections@multco.us.

Intaa waxaa dheer, halkan waxaa ku qoran waxa aad samayn karto si aad ugu diyaar garowdo doorashada oo aad u xaqiijiso in codkaaga la tiriyo.

1. **Isku diiwaan geli CODBIXINTA.** Cusboonaysii macluumaadka diiwaangelintaada codbixiyaha ama internetka iskaga diiwaan geli codbixinta (adigoo adeegsanaya lambarka laysanka darawalnimada/aqoonsiga Oregon ama afarta lambar ee ugu dambeeya Lambarkaaga Social Security) barta oregonvotes.gov/myvote. Waxaad sidoo kale buuxin kartaa Kaarka Diiwaan Gelinta Codbixiyaha ee Oregon oo laga heli karo galka daabacan ama maktabad ama xafiis boosto oo kasta oo ku yaal Degmada Multnomah (Multnomah County library). **Muddada kama dambaysta ah ee Diiwaan Gelinta Codbixiyuhu waa 13-ka Oktoobar.** Iska diiwaan geli Track Your Ballot (La Soco Warqadaada Codbixinta) barta [Multco.us/TrackYourBallot](https://multco.us/TrackYourBallot).
2. **Hel warqaddaada codbixinta.** Waxaad warqaddaada codbixinta boostada ku heli doontaa 14-ka Oktoobar ama wixii ka dambeeya. Haddii aadan helin warqaddaada codbixinta ugu dambayn 22-ka Oktoobar, tallaabo qaad oo kala xiriir xafiiska doorashooyinka 503-988-VOTE (8683).



Galalka Xogta Codbixiyaasha Degmada Multnomah oo Ku qoran af Soomaali

3. **Ku CODEE warqaddaada codbixinta oo u diyaari soo-celinta.** Xusuusnow inaad saxiixdo boqshadda soo-celinta warqaddaada codbixinta si aan u tirinno warqaddaada codbixinta. Saxiixaagu waa aqoonsigaaga. Haddii aad ilowdo inaad saxiixdo ama saxiixaagu uusan waafaqin diiwaannadayada, waan kula soo xiriiri doonaa si aad tallaabo u qaaddo annaguna u tirinno codkaaga. **Codbixiyayaasha: Xusuusnow inaad labada bog ee warqaddaada codbixinta ku riddo boqshadda soo-celinta – warqadda codbixinta doorashada guud iyo warqadda codbixinta tartanka musharrixiinta RCV.**
4. **Soo celi warqaddaada codbixinta.** Waxaa jira laba hab oo aad kusoo celin karto warqaddaada codbixinta.
 - 1) **Kusoo celi boostada,** boqshadda warqaddaada codbixinta waa in Calaamadda Boostada lagu dhufaa Talaadada, 3-da Nofeembar ama kahor, laguna helaa toddoba maalmood gudahood si loo tiriyo. Xaqiiji in warqaddaada codbixinta Calaamadda Boostada lagu dhufto Maalinta Doorashada – ama waxaa kasii wanaagsan, kahor Maalinta Doorashada. Doorashooyinka Degmada Multnomah (Multnomah County Elections) **waxay ku talinayaan in warqaddaada codbixinta boostada lagu diro ugu dambayn Talaadada, 27-ka Oktoobar**, si loo xaqiijiyo in Calaamadda Boostada lagu dhufto oo xafiis doorasho ku helo wakhti ku filan oo lagu tiriyo.
 - 2) **Goobta Rasmiga ah ee Laga Rido Warqadda Codbixinta,** warqadaha codbixinta ee lagu codeeyay waa in xafiis kasta oo doorashooyinka Degmada ah oo ku yaal Oregon ama Goobta Rasmiga ah ee Laga Rido Warqadda Codbixinta lagu helaa ugu dambayn 8:00 p.m., Talaadada, 3-da Nofeembar.
5. **Arag sida codkaagu isbeddel u sameeyo.** Natijjooyinka aan rasmiga ahayn ee doorashada waxaa la daabici doonaa wixii ka dambeeya 8:00 p.m. 3-da Nofeembar, 2026 barta [MultnomahVotes.gov](https://www.multnomahvotes.gov). Natijjooyinka kama dambaysta ah ee rasmiga ah ee doorashada waxaa la xaqiijiyaa ugu dambayn 30-ka Nofeembar.

Haddii aad qabto wax su'aalo ah, waxaad kala xiriiri kartaa xafiiskeena lambarka 503-988-VOTE (8683).

Wada-shaqayn wacan,



Tim Scott

Agaasimaha Doorashooyinka ee Degmada Multnomah

FADLAN OGOOW: Doorashooyinka Degmada Multnomah (Multnomah County)

Galalka Xogta Codbixiyaasha Degmada Multnomah oo Ku qoran af Soomaali

Elections) waxay daabacdaa macluumaadka musharrixiinta iyo qodobbada loo codeynayo sidii loo soo gudbiyay. Ma saxno hinkaada, shaqallada, naxwaha, jumlada, ciladaha ama xogta khaldan.



Caawinta Codbixiyaasha

Doorashooyinka Degmada Multnomah (Multnomah County Elections) waxay doonayaan in dhammaan codbixiyayaashu awoodaan inay codeeyaan ayna ogaadaan cidda ay ka codsanayaan caawinta codbixinta. Kooxda Caawinta Codbixiyaha ee Degmada (Voter Assistance Team VAT) waxay caawisaa codbixiyayaasha naafada ah iyo codbixiyayaasha kale.

VAT waxay kaa caawin kartaa inaad:

- Iskugu diiwaangalisid inaad codaysid ama hubisid diiwaangalintaada cod-bixinta.
- Calaamadi ama akhri warqadaada cod-bixinta.
- Cusbooneysii ama xaqiiji magacaaga, ciwaankaaga ama macluumaad kale ee codbixinta.
- Fahan shuruucda iyo tallaabooyinka doorashada ee cod-bixinta.

Adeegyadani mar walba waa bilaash.

Waxbadan ka oggow ikhtihaarada cod-bixinta aan saacidnay iyo kuwa madaxbanaan ee MultnomahVotes.gov

Nagalasoo xidhiidh adoo soo wacaya, iimayl u diraya ma foomkeena onlaaynka:

503.988.VOTE (8683)
800.735.2900 (TTY)
elections@multco.us
Multco.us/VATForm



I sawir Si aad u gasho oo aad u buuxiso foomka codsiga Kooxda Caawinta Codbixiyaha (Voter Assistance Team VAT). Multco.us/VATForm

Halkan waxaa ku qoran waxa aad samayn karto si aad isugu diyaarisoo ama u qorshayso codbixinta:

- Qorshee wakhti aad ku eegto waxa ku qoran warqaddaada codbixinta.

Galalka Xogta Codbixiyaasha Degmada Multnomah oo Ku qoran af Soomaali

- Kala hadal dadka kale tartannada musharrixiinta iyo arrimaha la codeynayo.
- Ka baar musharrixiinta ama qodobbada loo codeynayo internetka, TV-ga, raadiyaha, warsidaha, galalka xogta codbixiyaha ee gobalka ama degmada, ama ilo kale oo lagu kalsoon yahay.
- Sii naftaada wakhti aad kaga fikirto dookhyadaada.

Turjumaadaha luuqada, booqo MultnomahVotes.gov oo u dhaadhac dhanka hoose.

Soo celi Warqadaada Codbixinta



Noogu soo dir warqaddaada codbixinta adigoo adeegsanaya Boostada Mareykanka (U.S. Mail). Warqadaha codbixinta waa in Calaamadda Boostada lagu dhufaa Maalinta Doorashada ee 3-da Nofeembar, 2026 ama kahor. Ku soo dirista boostadu qasab maaha.



Warqaddaada codbixinta dhig Goob kasta oo Rasmi ah oo Laga Rido Warqadda Codbixinta oo ku taal Oregon ugu dambayn 8:00 p.m. Maalinta Doorashada ee 3-da Nofeembar, 2026 ama kahor.



Goobaha Sanduuqa Codbixinta Rasmiga ah oo furan 24 saac

Portland

North

- **Maktabadda Kenton (Kenton Library)** (Meesha Buugga Maktabadda Lagu Celiyo) 8226 N Denver Ave.
- **Beerta McCoy (McCoy Park)** oo ku taal geeska koonfur-bari ee McCoy Park una dhow isgoyska N Trenton St iyo Newman Ave. **Lug ayaa lagu geli karaa keliya.**
- **North Lombard McDonald's** 3011 N Lombard St. Sanduuqa Rasmiga ah ee Codbixinta wuxuu ku yaal jidka lugta. **Lug ayaa lagu geli karaa keliya.**
- **Maktabadda North Portland (North Portland Library)** (Meesha Buugga Maktabadda Lagu Celiyo) 512 N Killingsworth St.
- **Rose Quarter** wuxuu ku yaal dhinaca koonfureed ee Rose Quarter, agagaarka isha biyaha iyo calaamadda Rip City. Inta lagu jiro saacadaha shaqada ee caadiga ah, baarkin bilaash ah oo 15 daqiiqo ama ka yar ah ayaa laga heli karaa baarkinka Annex ee N Drexler Dr. ee ka baxsan Interstate Ave. (Baarkin lama heli karo inta lagu jiro xiliga xafladaha Rose Quarter). **Lug ayaa lagu geli karaa keliya.**
- **Maktabadda St. Johns (St. Johns Library)** 7510 N Charleston Ave. Goobta Rasmiga ah ee Laga Rido Warqadda Codbixinta waa dalool ku yaal derbiga dibadda, dhinaca midig ee albaabka weyn, una dhow qaybta sare ee meesha dadka naafada ahi maraan.

Northeast

- **Maktabadda Albina (Albina Library)** 205 NE Russell St. Sanduuqa Rasmiga ah ee Codbixinta wuxuu ku xigaa meesha buugga lagu celiyo ee dhinaca koonfureed ee dhismaha, una dhow baarkinka baaskiillada.
- **Maktabadda Gregory Heights (Gregory Heights Library)** (Meesha Buugga Maktabadda Lagu Celiyo) 7921 NE Sandy Blvd.
- **Maktabadda Hollywood (Hollywood Library)** (Meesha Buugga Maktabadda Lagu Celiyo) 4040 NE Tillamook St.
- **Maqaayadda McDonald's (McDonald's Restaurant)** 2010 NE César E. Chávez Blvd. Sanduuqa Rasmiga ah ee Codbixinta wuxuu ku yaal dhinaca galbeed ee NE 40th Ave. inta u dhaxaysa NE Tillamook St. iyo Hancock St., wuxuuna u dhow yahay Maktabadda Hollywood (Hollywood Library).
- **Xaafadda Parkrose (Parkrose Neighborhood)** 4390 NE 102nd Ave. Sanduuqa Rasmiga ah ee Codbixinta wuxuu ku yaal baarkinka bari ee ka soo horjeeda MHCC Maywood Park Center ee NE 102nd Ave. iyo Prescott St.

Galalka Xogta Codbixiyaasha Degmada Multnomah oo Ku qoran af Soomaali

Northwest

- **Maktabadda Northwest (Northwest Library)** CINWAAN CUSUB: 2030 NW Pettygrove St. Sanduuqa Rasmiga ah ee Codbixinta wuxuu ku yaal dhinaca midig ee meesha buugga maktabadda lagu celiyo.

Southeast

- **Doorashooyinka Degmada Multnomah (Multnomah County Elections)**
1040 SE Morrison St.
 - **SE 11th Avenue** Sanduuqa Rasmiga ah ee Codbixinta wuxuu ku yaal dhinaca bari ee SE 11th Ave. inta u dhaxaysa SE Morrison St. iyo Belmont St.
 - **SE Belmont Street** Sanduuqa Rasmiga ah ee Codbixinta wuxuu ku yaal dhinaca waqooyi ee SE Belmont St. inta u dhaxaysa SE 10th Ave. iyo 11th Ave.
 - **1040 SE Morrison Street** Lug/Baaskiil ayaa lagu geli karaa, Sanduuqa Rasmiga ah ee Codbixinta waa dalool ku yaal dhinaca dhismaha ee geeska SE 11th Ave. iyo Morrison St.
- **Maktabadda Belmont (Belmont Library)** 1038 SE César E. Chávez Blvd. Sanduuqa Rasmiga ah ee Codbixinta wuxuu ku yaal dhinaca midig ee meesha buugga lagu celiyo, una dhow albaabka weyn.
- **Maktabadda Holgate (Holgate Library)** 7905 SE Holgate Blvd. Sanduuqa Rasmiga ah ee Codbixinta wuxuu ku yaal dhinaca bidix ee goobta aan la taaban ee lagala baxo buugaagta maktabadda ee la sii qabsaday, dhinaca waqooyi ee dhismaha, una dhow baarkinka. **Lug ayaa lagu geli karaa keliya.**
- **Maktabadda Midland (Midland Library)** 805 SE 122nd Ave. Sanduuqa Rasmiga ah ee Codbixinta wuxuu ku xigaa meesha buugga lagu celiyo ee dhinaca koonfureed ee dhismaha. Waxaa waraaqaha codbixinta sidoo kale lagu ridi karaa Sanduuqa Codbixinta Rasmiga ah ee yaala qaybta barakinka ee maktabadda.
- **Portland Mercado** 7238 SE Foster Rd. Sanduuqa Rasmiga ah ee Codbixinta wuxuu ku yaal barxadda Portland Mercado ee SE Foster Rd. iyo 72nd Ave. **Lug ayaa lagu geli karaa keliya.**
- **Maktabadda Rockwood (Rockwood Library)** (Meesha Buugga Maktabadda Lagu Celiyo) 17917 SE Stark St.
- **Maktabadda Sellwood – Moreland (Sellwood – Moreland Library)** (Meesha Buugga Maktabadda Lagu Celiyo) 7860 SE 13th Ave.
- **Maktabadda Woodstock (Woodstock Library)** (Meesha Buugga Maktabadda Lagu Celiyo) 6008 SE 49th Ave.

Southwest



Galalka Xogta Codbixiyaasha Degmada Multnomah oo Ku qoran af Soomaali

- **A-Boy Supply** 7365 SW Barbur Blvd.
- **Maktabadda Capitol Hill (Capitol Hill Library)** (Meesha Buugga Maktabadda Lagu Celiyo) 10723 SW Capitol Hwy.
- **Maktabadda Central (Central Library)** (Meesha Buugga Maktabadda Lagu Celiyo) 801 SW 10th Ave. Warqadaha codbixinta waxaa sidoo kale lagu ridi karaa **meesha baabuurka looga rido** buugaagta ee ku taal SW 11th Ave. inta u dhaxaysa SW Yamhill St. iyo Taylor St.
- **Maktabadda Hillsdale (Hillsdale Library) (Waxay u xiran tahay dhismaha socda awgiis)** 1525 SW Sunset Blvd. Sanduuqa Rasmiga ah ee Codbixinta wuxuu ku yaal jidka lugta.
- **Fagaaraha Pioneer Courthouse (Pioneer Courthouse Square)** 700 block ee SW Broadway (oo ku xiga Starbucks kana soo horjeeda Nordstrom) **Lug ayaa lagu geli karaa keliya.**

Fairview

- **Maktabadda Fairview – Columbia (Fairview – Columbia Library)** (Meesha Buugga Maktabadda Lagu Celiyo) 1520 NE Village St.

Gresham

- **Maktabadda Degmada Bari (East County Library) – CUSUB** – 475 NW Division St. Sanduuqa Rasmiga ah ee Codbixinta wuxuu ku yaal dhinaca bidix ee meesha buugga lagu celiyo ee albaabka waqooyi.
- **Maktabaddii hore ee Gresham (Former Gresham Library)** 385 NW Miller Ave. **Baabuur ayaa lagu geli karaa** Sanduuqa Rasmiga ah ee Codbixinta wuxuu ku yaal baarkinka.
- **Xarunta Codbixinta Degdega ah (Voting Center Express) (Saacado Kooban)** Dhismaha Bariga Degmada Multnomah (Multnomah County East Building), 600 NE 8th St. Waxaa jira Sanduuqa Rasmiga ah ee Codbixinta oo ku yaal gudaha Xarunta Codbixinta Degdega ah (Voting Center Express), dabaqa koowaad ee Dhismaha Bariga Degmada Multnomah (Multnomah County East Building). Waxay furan tahay keliya inta lagu jiro saacadaha xarunta codbixintu furan tahay. Waxaad u baahan doontaa inaad baakinka gaariga dhigato aadna lugayso si aad ugu rido warqadaada codbixinta.

Troutdale

- **Maktabadda Troutdale (Troutdale Library)** (Meesha Buugga Maktabadda Lagu Celiyo) 2451 SW Cherry Park Rd.

Xaqiiqooyinka aad Ka Ogaanayso Codeynta iyo Doorashooyinka

Yaa isku diiwaan gelin kara si ay uga codeeyaan Oregon?

Waa qasab inaad tahay muwaadin Mareykan ah,

Waa inaad dagan tahay Oregon,

Waa inaad jirtaa ugu yaraan 16 sano. Waxaad heli doontaa warqada koobaad ee codbixinta oo laguugu soo dirayao boostada marka aad jirto ugu yaraan 18 sano.

Waa inaad isku diiwaan gelisaa inaad codeyso ugu yaraan 21 maalmood kahor Maalinta Doorashada.

Sidee ayaan iskugu diiwaan gelin karaa codbixinta?

Internetka iska diiwaan geli barta oregonvotes.gov/register.

Kaarka Diiwaan Gelinta Codbixiyaha ee Oregon oo warqad ah kaasoo laga soo qaadan karo xafiiska doorashada, DMV, maktabada dadwaynaha, ama xafiiska boostada.

Sidee ayay codeynta lagu diro boostadu u shaqeysaa?

Dhammaan doorashooyinka Oregon waxaa qabta xafiiska doorashooyinka degmada. Xafiiska doorashooyinka ayaa warqadaha codbixinta boostada toos ugu dira codbixiyaasha. Codbixiyaasha ayaa buuxinaaya warqadahooda codbixinta, kadibna ku celinaaya xafiiska doorashooyinka ee degmada oo loogu diraayo boostada ama waxaa lagu ridi karaa Sanduuqa Codbixinta Rasmiga ah.

Ku dir codbixinta boostada adoo raacaaya dhawr talaabo oo fudud:

1. Isku diiwaan gelinta Codbixinta
2. Hel Kaarka Ogeysiiska Codbixiyaha
3. Hel Galka Xogta Codbixiyaha
4. Hel Warqadaada Codbixinta
5. Ku Codee Warqadaada Codbixinta
6. Soo celi Warqadaada Codbixinta

Sidee ayaan ugu codeynayaa warqadeyda codbixinta?

Vote for One

☒ Candidate 1

☐ Candidate 2

☐ OR Write-in on line above

Radii jawaabta musharaxa ama qodobka loo codeynaayo (YES (HAA) ama NO (MAYA)) ee aad dooranayso. Gebi ahaanba khad madoow ku masax goobinta geeska bidix ee dookhaaga adoo adeegsanaaya khadda buluuga ah ama madoowga ah. Ha adeegsan qalin koobiyo.

Codadka Qorista Dookha

Vote for One

☐ Candidate 1

☐ Candidate 2

☒ **Candidate 3**

☐ OR Write-in on line above

Si aad u qorto codka musharax aan ku jirin liiska warqada codbixinta, si buuxda u calaamadi goobinta geeska bidix ee laynka loo sameeyay xafiiska loo tartamaayo kadibna ku qor magaca buuxa ee musharaxa laynkaas.

Muhiim!

- Xaqiiji inaad si sax ah u calaamadisay dookhaaga tartan kasta.
- Warqadaada codbixinta rasmiga ah ayay ku qornaan karaan tartannada daabacan labada dhinacba.
- Ku rid warqadda codbixinta boqshada soo celinta ee aqoonsiga leh.
- Akhri Bayaanka Codbixiyaha oo ku qoran boqshada soo celinta kadibna saxiix godka saxiixa.
- **Warqadaada codbixinta lama tirin doono haddii aadan saxiixin boqshada soo celinta.**
- Saxiix kasta waxaa loo eegayaa saxiixa diiwaan gelinta ee ku qoran galka. Saxiixyadu waa inay iswaafaqaan si warqada codbixinta loo tiriyo.

Haddii aad u codeyso musharixiin ka badan inta loo ogol yahay xafiis ama haddii aad ku codeyso **labadaba Yes (Haa) iyo No (Maya)** qodobka loo codeynaayo, waxaa la yiraahdaa codbixin xadkeedii dhaaftay **codkaagana lama tirin doono** tartankaas.

Haddii aad khalad samayso ama aad badesho fikirkaaga inta aad calaamadinayso warqadaada codbixinta, adiga ayaa sixi kara.

Galalka Xogta Codbixiyaasha Degmada Multnomah oo Ku qoran af Soomaali

Arag tusaalaha hoose.

- **Dookhaaga si cad u muuji** si ujeeddadaada loo fahmo codkaagana si sax ah loo tiriyo.
- Haddii aadan awoodin inaad saxdo warqadaada codbixinta, waxaad codsan kartaa warqadda codbixinta oo badel ah oo aad ka helayso xafiiska doorashooyinka

☒ Yes ☐ No Kan	☐ Yes ☐ No
☐ Yes ☒ No Ma aha kan	☐ Yes ☒ No

Xaqiiqooyinka aad ka ogaanyso Codbixinta Dookhyada (Ranked Choice Voting RCV)

Codbixinta Dookhyada (Ranked Choice Voting RCV) waxay codbixiyayaasha u oggolaanaysaa inay musharrixiin badan u kala hormariyaan sida ay u kala doorbidayaan halkii ay mid keliya ka dooran lahaayeen. Codbixiyayaasha Degmada Multnomah waxay adeegsadaan RCV si ay u doortaan musharrixiinta xilalka Magaalada Portland (City of Portland) iyo Degmada Multnomah.

Sida Loo Buuxiyo Warqaddaada Codbixinta Dookhyada

Musharrixiinta u kala hormari sida aad u kala doorbidayso.

	Rank 1	Rank 2	Rank 3	Rank 4	Rank 5	Rank 6
Candidate A	☐	☐	☐	☒	☐	☐
Candidate B	☐	☐	☐	☐	☐	☒
Candidate C	☐	☒	☐	☐	☐	☐
Candidate D	☐	☐	☐	☐	☒	☐
Candidate E	☒	☐	☐	☐	☐	☐
Candidate F	☐	☐	☐	☐	☐	☐
<i>Nora Sample</i> Write-In	☐	☐	☒	☐	☐	☐

Ku buuxi hal goobin seedka Rank 1 (Heerka 1) ee musharaxa kuu ah dookha 1^{aad}. Haddii uu jiro musharax kuu ah dookha labaad, buuxi hal koobin oo ku jirta seedka Rank 2 (Heerka 2) ee musharaxaad, kadibna sidaas ku wad.

Talooyin ay tahay inaad maskaxda ku hayso:


- Keliya kala hormari musharrixiinta aad taageersan tahay in la doorto.
- Codkaaga weli waa la tirinayaa haddii aad kala hormariso 1 musharax; kala hormarinta musharrixiin dheeraad ah waa ikhtiyaari.
- Kala hormarinta musharrixiin dheeraad ah waxba uma dhimayso musharaxa kuu ah dookha 1^{aad}.
- Haddii aad qorto musharax, waa inaad sidoo kale u buuxisaa heer.

Khaladaadka Caadiga ah ee Laga Fogaado

Si warqaddaada codbixinta loogu tiriyo sidii aad ugu talagashay, xaqiiji inaad buuxiso **wax aan ka badnayn hal goobin seedkiiba** iyo **wax aan ka badnayn hal goobin safkiiba**.


Galalka Xogta Codbixiyaasha Degmada Multnomah oo Ku qoran af Soomaali

Codadka Xad-dhaafka ah



HA buuxin wax ka badan hal goobin seedkiiba. Haddii aad musharrixiin badan geliso isla heerka, tan waxaa loo yaqaan Codbixin xad dhaaf ah. Saraakiisha doorashadu codkaaga uma tirin karaan musharrixiinta ku jira heerkaas midkoodna.

Dookhyada soo Noqnoqda




HA buuxin wax ka badan hal goobin safkiiba. Haddii aad hal musharax dhowr jeer kala hormariso, tan waxaa loo yaqaan kala hormarin soo noqnoqota. Heerka ugu sarreeya ee aad musharax siiso ayaa la tirin doonaa, dhammaan heerarka kale ee musharaxaasna waa la iska indho tiri doonaa.

Khalad ma ka samaysay warqaddaada codbixinta? Ha welwelin! Waad sixi kartaa khaladaadka ama waad beddeli kartaa codka ku yaal warqaddaada codbixinta.

- Ku dul qor “x” goobin kasta oo aad buuxisay laakiin aadan rabin in la tiriyo.
- Haddii aadan awoodin inaad saxdo warqadaada codbixinta, waxaad codsan kartaa warqadda codbixinta oo badel ah oo aad ka helayso xafiiska doorashooyinka.

Galalka Xogta Codbixiyaasha Degmada Multnomah oo Ku qoran af Soomaali



Ku Tababaro Adeegsiga Codbixinta Dookhyada

Tababarku wuxuu keenaa kaamilnimo!

Kahor intaadan buuxin warqaddaada codbixinta, sawir koodhka QR ama booqo multco.us/rcv si aad ugu tababarto Codbixinta Dookhyada adigoo adeegsanaya doorasho tijaabo ah.



Qodobka Loo Codeynaayo 26-267 Magaalada Portland (City of Portland)

Wax ka beddelaya Xeer Hoosaadka: Dadka deggan Portland ayaa go'aaminaya sida loo isticmaalo 2% ka mid ah miisaaniyadda sannadlaha ah ee kharashaadka ikhtiyaariga ah ee magaalada.

SU'AAL:

Portland ma abuuraysaa barnaamij miisaaniyad-dejin oo ka qaybgal ah si dadka deegaanku u gaaraan go'aanno kama dambays ah oo ku saabsan kharash-gareynta 2% miisaaniyadda magaalada ee kharashaadka ikhtiyaariga ah?

DULMAR:

Hadda, Duqa magaalada wuxuu la shaqeeyaa Maamulaha Magaalada, waaxyaha iyo bulshada si loo diyaariyo miisaaniyadda la soo jeediyay; kadibna Dawlada Hoose ayaa tixgelisa, wax ka beddesha haddii loo baahdo, oo ansixisa dhageysiyada dadweynaha kaddib. Haddii qodobka loo codeynaayo aan la ansixin, hannaankan waxba iskama beddeli doono.

Haddii qodobka loo codeynaayo la ansixiyo, Xeer Hoosaadka wax laga beddelay wuxuu Dawlada Hoose ku waajabinayaa inay barnaamijka miisaaniyad-dejinta ka qaybgalka ah u qoondayso qaddar u dhigma ugu yaraan 2% kharashaadka socda ee ikhtiyaariga ah ee Maaliyada Guud ee magaalada ee la ansixiyay (Dawlada Hoose waxay lacagta ka heli kartaa dhammaan miisaaniyadda magaalada si ay u buuxiso waajibaadka maalgelinta); barnaamijkaas oo:

- Lagu horumariyay talooyinka guddi kormeer ah oo ka kooban dadka deggan dhammaan degmooyinka Dawlada Hoose, kuwaas oo lagu soo xulay hannaan ay Dawlada Hoose go'aamisay
- U furan soo-jeedin kasta oo maalgelin ah oo qofka deegaanka ahi ka soo gudbiyo mashaariic magaalada oo dhan ama degmo gaar ah:
 - Shaqaalaha magaalada iyo wakiillada miisaaniyadda ee dhammaan degmooyinka ayaa soo-jeedimaha qiimeeya oo u habeeya tiro kooban oo mashaariic la fulin karo iyagoo raacaya hannaan daahfuran
 - Mashaariicda la fulin karo waxay u gudbayaan hannaan xulasho oo kama dambays ah oo u furan dhammaan dadka deegaanka, ayna si fudud uga qayb geli karaan
- Wuxuu hawlgelayaa July 2027
- Marka loo eego saadaashii dhaweyd, qiyaasta hordhaca ahi waa:
 - 16.4 milyan sannad-maaliyadeedka 2027-28
 - 17.0 milyan sannad-maaliyadeedka 2028-29
- Waafaqsan Sharciga Miisaaniyadda Maxalliga ah ee Oregon

Galalka Xogta Codbixiyaasha Degmada Multnomah oo Ku qoran af Soomaali

Qodobo kale.

Talaabada 26-265

Magaalada Troutdale (City of Troutdale)

Canshuurta Ikhtiyaariga ah ee Deegaanka oo Shan Sano ah ee Hawlaha Booliska, Dab-damiska iyo 911.

SU'AAL:

Troutdale ma ansixisaa canshuur ikhtiyaari ah oo deegaanka ah oo ah \$1.60 halkii \$1,000 ee qiimaha la qiimeeyay si loogu maalgeliyo adeegyada booliska, dabdamiska iyo 911? Aftidan waxay sababi kartaa in cashuurta hantidu ay sare u kacdo in ka badan boqolkiiba saddex.

DULMAR:

Troutdale waxay adeegyada Booliska, Dab-damiska iyo 911 ku bixisaa qandaraasyo ay la gashay: Xafiiska Nabad-galyada ee Degmada Multnomah (Multnomah County Sheriff's Office), Waaxda Dab-damiska Magaalada Gresham (City of Gresham Fire Department), iyo Xafiiska Isgaarsiinta Xaaladaha Degdegga ah (Bureau of Emergency Communications).

Kharashaadka adeegyada muhiimka ah ee Badqabka dadweynaha si joogto ah ayay u kordhayaan, waxaana la saadaalinayaa inay ka dhakhso badan u kacaan maalgelinta la heli karo. Haddii aan la helin il maalgelin oo waarta, farqiga u dhexeeya dakhliga iyo kharashaadka Badqabka dadweynaha wuxuu noqon doonaa mid aan la sii wadi karin, taasoo halis gelinaysa isku halaynta muddada dheer ee adeegyada Booliska, Dabdamiska iyo 911.

Hadii qodobkan la ansixiyo, Dawlada Hoose ee hadda jirta waxay Kharashka Badqabka Dadweynaha ee \$25 ku beddeli doontaa canshuur ikhtiyaari ah oo deegaanka ah oo codbixiyayaashu ansixiyeen, taasoo ah \$1.60 halkii \$1,000 ee qiimaha hantida la qiimeeyay.

Guriga celceliska ah ee Troutdale oo qiimihiisa la qiimeeyay uu yahay qiyaastii \$267,800, wuxuu ku kacayaa qiyaastii \$428.48 sanadkii. Maadaama la baabi'in doono Kharashka Adeega Badqabka Dadweynaha, mulkiilaha guriga ee celceliska ahi ma bixin doono kharashka hadda jira ee \$300 sanadkii, taasoo keenaysa koror lagu qiyaasay kharashka saafiga ah ee sanadkii oo ah qiyaastii \$128.48, iyadoo isla markaasna maalgelin gaar ah loo qoondeynayo adeegyada Booliska, Dabdamiska iyo 911.

Lacagta la ururinayo waxaa lagu qiyaasay \$3,556,392 sanadka 2027-28, \$3,663,084 sanadka 2028-29, \$3,772,977 sanadka 2029-30, \$3,886,166 sanadka 2030-31, iyo \$4,002,751 sanadka 2031-32.

Kharashaadka Badqabka dadweynaha ayaa durba ka badan \$10 milyan sanadkii, waxaana la saadaalinayaa inay dhaafaan \$14 milyan marka la gaaro 2030.

Galalka Xogta Codbixiyaasha Degmada Multnomah oo Ku qoran af Soomaali

Canshuurtani waxay xaqiijinaysaa maalgelin deggan oo lagu kalsoonaan karo oo loogu talagalay Badqabka dadweynaha mustaqbalka Troutdale.

Bayaanka Sharaxaada ah:

In ka badan toban sano, Magaalada Troutdale (City of Troutdale) waxay adeegyada Booliska, Dabdamiska iyo 911 ku bixinaysay qandaraasyo ay la gashay Xafiiska Nabadgalyada ee Degmada Multnomah (Multnomah County Sheriff's Office), Waaxda Dabdamiska Magaalada Gresham (City of Gresham Fire Department), iyo Xafiiska Isgaarsiinta Xaaladaha Degdegga ah (Bureau of Emergency Communications BOEC). Inkastoo iskaashiyadani ay bixiyeen adeegyo xaalad degdeg ah oo lagu kalsoonaan karo, kharashka sii wadistoodu aad ayuu u kordhay, wuxuuna weli ka dhakhso badan yahay dakhliga ay Magaaladu heli karto.

Canshuuraha hantida maguurtada ah ee Troutdale waxaa la saadaalinayaa inay soo xareeyaan \$7.9 milyan sannad-maaliyadeedka 26-27, ayna sanad kasta kordhaan 3% ilaa qiyaastii \$8.9 milyan marka la gaaro 2030. Taas beddelkeeda, qandaraaska adeegyada dabdamiska ee Magaalada wuxuu ka badan yahay \$3.5 milyan sanadka maaliyadeed ee soo socda, qandaraaska adeegyada booliska ee Magaalada waxaa la saadaalinayaa inuu ka badan yahay \$6.3 milyan, BOEC-na waa qiyaastii \$1 milyan. Kharashaadka isku dhafan ee Booliska, Dabdamiska, 911 iyo Badqabka dadweynaha ee la xiriira ayaa hadda ka badan \$10 milyan sanadkii, waxaana la saadaalinayaa inay dhaafaan \$14 milyan marka la gaaro sannad-maaliyadeedka 2030-31. Isbadalada hadda jira waxay muujinayaan farqi maalgelin oo ah \$3 milyan sanadka soo socda, kaasoo sanad kasta kordhaya ilaa uu ka badanayo \$5 milyan marka la gaaro 2030.

Talaabadan wuxuu dejinayaa canshuur ikhtiyaari ah oo deegaanka ah oo shan sano soconaysa, taasoo ah \$1.60 halkii \$1,000 ee qiimaha hantida la qiimeeyay, si gacan looga geysto maalgelinta adeegyada Booliska, Dabdamiska iyo 911. Dakhliga canshuurta waxaa keliya oo loo isticmaali karaa in lagu dhimo kharashaadka hawlaha Booliska, Dabdamiska iyo 911, iyadoo lala kaashanayo dakhliga canshuurta hantida maguurtada ah, si wax looga qabto farqiyaada maalgelinta ee hadda jira iyo kuwa la saadaaliyay, loomana isticmaali karo adeegyada kale ee Magaalada ee aan xiriirka la lahayn. Haddii la ansixiyo, Dawlada Hoose waxay doonaysaa inay baabi'iso Kharashka Adeegga Badqabka Dadweynaha ee hadda jira oo ah \$25 bishii, kaasoo haddii kale ka badan kara \$65 bishii marka la gaaro 2030. Soo jeedintu waxay kharashka adeegga ku beddeli doontaa canshuurta ikhtiyaariga ah ee deegaanka ee codbixiyayaashu ansixiyeen. Haddii aan la helin il maalgelin oo dheeraad ah, kharashka adeeggu wuxuu u baahan doonaa koror mustaqbalka ah si uu gacan uga geysto daboolidda kharashaadka sii kordhaya ee Booliska, Dabdamiska iyo 911.

Muddada shanta sano ah waxaa loogu talagalay inay bixiso maalgelin deggan, iyadoo Magaalada la siinayo waqti ku filan oo ay ku qiimeeyso kuna hirgeliso xalalka muddada dheer ee Badqabka dadweynaha. Dadaalladaas waxaa ka mid noqon kara ka wada xaajoodka heshiisyada adeegga ee mustaqbalka, qiimeynta habab kale oo lagu bixiyo adeegyada dabdamiska iyo caafimaadka degdegga ah, tixgelinta suurtagalnimada

Galalka Xogta Codbixiyaasha Degmada Multnomah oo Ku qoran af Soomaali

samaynta waax dabdamis ama ku biiridda mid jirta iyadoo la ballaarinayo xuduudaha, iyo qiimeynta hababka mustaqbalka ee bixinta adeegyada booliska, oo ay ku jirto suurtagalnimada dib-u-dhisidda Waaxda Booliska Troutdale (Troutdale Police Department). Isbeddel kasta oo muddada dheer ah wuxuu dhici doonaa oo keliya kadib dib u eegis dadweyne oo dheeraad ah, tixgelinta Dawlada Hoose, iyo hannaan kasta oo dadweyne oo sharcigu farayo.

Magaaladu waxay garwaaqsan tahay in canshuur ikhtiyaari ah oo deegaanka ah oo ku meel gaar ahi aysan xal joogto ah u ahayn caqabadaha maalgelinta ee haysta bulshooyin badan oo Oregon ah. Xaddidaadaha gobolka ee canshuurta hantida maguurtada ah waxay weli xanibayaan koboca dakhliga deegaanka, halka kharashka bixinta adeegyada xaaladaha degdegga ahi uu sii kordhayo. Magaaladu waxay doonaysaa inay sii waddo la shaqaynta saaxiibbada gobolka si loo aqoonsado xeelado maalgelin oo waara oo muddada dheer ah, kuwaasoo bixiya adeegyo xaalad degdeg ah oo lagu kalsoonaan karo iyadoo la ilaalinayo mas'uuliyadda maaliyadeed ee dadka deegaanka iyo ganacsiyada.

Dawlada Hoose waxay sii wadi doontaa dib u eegista maalgelinta Badqabka dadweynaha iyo bixinta adeegyada iyada oo loo marayo shirar dadweyne, ka doodista miisaaniyadda, iyo ka qaybgelinta dadweynaha ee joogtada ah.

Qodobkani wuxuu maalgelin gaar ah u qoondeynayaa adeegyada Booliska, Dabdamiska iyo 911, iyadoo Magaaladu ay hannaan dadweyne oo furan ku qiimeynayso maalgelinta Badqabka dadweynaha iyo fursadaha bixinta adeegyada ee muddada dheer.

(Macluumaadkaan waxaa bixiyay: Sarah Skroch, Diiwaanhayaha Magaalada)

Qodobka Loo Codeynaayo 26-266 Magaalada Troutdale (City of Troutdale)

TALOBIXIN COD-BIXIN: Troutdale Ma Samaysataa Waax Boolis oo Dawladeed Hoose?

SU'AAL:

TALOBIXIN COD-BIXIN: Magaaladu ma sii waddaa qorshaynta iyo samaynta Waaxda Booliska Troutdale (Troutdale Police Department)?

DULMAR:

Tani waa codbixin talobixin ah oo aan khasab ahayn, mana oggolaanayso ama soo rogayso wax canshuur, kharash ama qarash-bixin ah.

Tani waa codbixin talobixin ah oo aan khasab ahayn, mana oggolaanayso ama soo rogayso wax canshuur, kharash ama qarash-bixin ah.

Sanadkii 2015, Magaalada Troutdale (City of Troutdale) waxay kala dirtay Waaxdeeda Booliska, waxayna Xafiiska Nabad-galyada ee Degmada Multnomah (Multnomah County Sheriff's Office) qandaraas kula gashay bixinta adeegyada booliska. Go'aankaas wuxuu qayb ahaan ku salaysnaa filashada ah in qandaraasku dhimayo kharashaadka muddada dheer iyadoo la sii ilaalinayo adeegyada badqabka dadweynaha.

Tan iyo markaas, kharashka adeegyada booliska ee qandaraaska lagu bixiyo wuu kordhay, Magaaladuna waxay sii wadday qiimeynta heerarka adeegga, baahiyaha hawlgalka, filashooyinka bulshada iyo waaritaanka maaliyadeed ee muddada dheer. Iyadoo qayb ka ah dib u eegistaas, Magaaladu waxay samaysay qorshayaal hordhac ah oo ku saabsan suurtagalnimada dib-u-dhisidda Waaxda Booliska Troutdale (Troutdale Police Department).

Codbixintan talobixinta ahi waxay weydiinaysaa in Magaaladu ay sii waddo qorshaynta samaynta Waaxda Booliska Troutdale (Troutdale Police Department), iyadoo qiimeynaysa kharashaadka, arrimaha hawlgalka iyo faa'iidooyinka Waax Boolis oo dawlad hoose leedahay iyo adeegyada booliska ee qandaraaska lagu sii bixiyo labadaba.

Dawlada Hoose waxay tixgelin doontaa natiijooyinka codbixintan talobixinta ah marka ay qiimeynayso fursadaha adeegga booliska ee mustaqbalka.

Bayaanka Sharaxaada ah:

Codbixintan talobixinta ahi waxay weydiinaysaa in Magaalada Troutdale (City of Troutdale) ay sii waddo qorshaynta suurtagalnimada samaynta Waax Boolis oo dawlad hoose leedahay. Codbixinta talobixinta ahi ma aha mid khasab ah, mana oggolaanayso

Galalka Xogta Codbixiyaasha Degmada Multnomah oo Ku qoran af Soomaali

Magaalada inay samayso Waax Boolis, soo rogto wax canshuur ama kharash ah, shaqaaleysiiso shaqaale, ama joojiso adeegyada booliska ee qandaraaska lagu bixiyo. Natiiyooyinku waxay ra'yiga dadweynaha siin doonaan Dawlada Hoose marka ay qiimeynayso fursadaha adeegga booliska.

Sanadkii 2015, Magaaladu waxay kala dirtay Waaxda Booliska Troutdale (Troutdale Police Department), waxayna Xafiiska Nabad-galyada ee Degmada Multnomah (Multnomah County Sheriff's Office MCSO) la gashay qandaraas ku saabsan adeegyada booliska. Waqtigaas, qandaraaska waxaa laga filayay inuu yareeyo kharashaadka iyadoo la ilaalinayo adeegyada badqabka dadweynaha. Tan iyo markaas, kharashka adeegyada booliska ee qandaraaska lagu bixiyo si weyn ayuu u kordhay, taasoo ku kalliftay Magaalada inay qiimeyso waaritaanka maaliyadeed ee muddada dheer ee sii wadista habka hadda jira.

Iyadoo qayb ka ah qiimeyntaas, Magaaladu waxay samaysay qorshayaal hordhac ah oo shaqaaleysiin, fikrado hawlgal iyo saadaalo maaliyadeed oo ku saabsan Waaxda Booliska Troutdale (Troutdale Police Department) ee suurtagalka ah. Sida ku cad falanqaynnadaas hordhaca ah, waax ay dawladda hoose maamusho waxay bixin kartaa adeegyo boolis oo deegaanka laga maamulo, iyadoo kharashkeeda la saadaalinayo inuu la mid noqon karo, lagana yaabo inuu ka yaraado, adeegyada qandaraaska lagu sii bixiyo, hase yeeshee kharashaadka dhabta ahi waxay ku xirnaan doonaan hirgelinta, shaqaaleysiinta, heshiisyada shaqaalaha, qalabka, xarumaha iyo xaaladaha dhaqaale ee mustaqbalka. Qorshaynta hordhaca ah ee Magaalada waxay sidoo kale tixgelinaysaa hirgelin marxalado leh oo loogu talagalay in waqti loogu helo qorista iyo tababarka shaqaalaha, diyaarinta siyaasadaha iyo habraacyada, helitaanka qalabka, iyo isku-dubbaridka kala-guurka adeegyada booliska kahor inta aan si buuxda loo qaadin mas'uuliyadda hawlgalka.

Taageerayaasha Waax Boolis oo dawlad hoose leedahay waxay tilmaamayaan faa'iidooyin ay ka mid yihiin maamulidda mudnaanta hawlaha booliska ee deegaanka, isla xisaabtan toos ah oo lala yeesho hoggaanka Magaalada, saraakiil si gaar ah loogu qoondeeyay Magaalada Troutdale (City of Troutdale), dabacsanaanta lagu waafajinayo shaqaalaha iyo hawlgelintooda baahiyaha deegaanka, iyo awoodda lagu horumarinayo barnaamijyo bulshada u gaar ah. Taageerayaashu waxay sidoo kale xusayaan in waax deegaanka laga maamulo ay bixin karto saadaal wanaagsan oo ku saabsan kharashaadka adeegga booliska ee mustaqbalka, ayna kordhin karto dabacsanaanta lagu waafajinayo shaqaalaha iyo heerarka adeegga mudnaanta deegaanka.

Qaar kale waxay taageersan yihiin in adeegyada booliska ee qandaraaska lagu bixiyo lagu sii wado Xafiiska Nabad-galyada ee Degmada Multnomah (Multnomah County Sheriff's Office). Waxay xusayaan in habka hadda jira uu bixiyo helitaanka khayraadka baaritaanka ee gobolka, cutubyo takhasus leh, awoodaha wax-ka-qabashada xaaladaha degdegga ah, nidaamyo maamul oo dhisan, iyo shabakad ballaaran oo sharci fulinta gobolka ah. Waxay sidoo kale tilmaamayaan kharashaadka iyo caqabadaha hawlgalka ee la xiriira samaynta Waax Boolis oo cusub, oo ay ku jiraan qorista iyo haynta shaqaale aqoon leh, iibsashada qalabka, diyaarinta siyaasadaha iyo

Galalka Xogta Codbixiyaasha Degmada Multnomah oo Ku qoran af Soomaali

habraacyada, iyo maaraynta kala-guurka adeegyada qandaraaska lagu bixiyo.

Codbixinta talobixinta ah kadib, Dawlada Hoose waxay tixgelin doontaa natiijooyinka iyadoo sii waddo qiimeynta fursadaha adeegga booliska ee mustaqbalka iyada oo loo marayo hannaan dadweyne oo furan. Haddii Dawlada Hoose ay ugu dambayn go'aamiso in samaynta Waaxda Booliska Troutdale (Troutdale Police Department) la sii wado, waxaa loo baahan doonaa qorshayn dheeraad ah, shirar dadweyne iyo tallaabooyin mustaqbalka ah oo Dawlada Hoose qaaddo kahor inta uusan wax kala-guur ahi dhicin. Iyadoo qayb ka ah kala-guurkaas, Magaaladu waxay filaysaa inay dib u degto Dhismaha Booliska Troutdale (Troutdale Police Building) ee jira, kaasoo hadda uu deggan yahay Xafiiska Nabad-galyada ee Degmada Multnomah (Multnomah County Sheriff's Office). Hawlaha dheeraadka ah ee kala-guurka waxaa ka mid noqon doona qorista shaqaalaha, helitaanka qalabka, diyaarinta siyaasadaha, iyo isku-dubbaridka wareejinta mas'uuliyadaha sharci fulinta. Haddii Dawlada Hoose ay taa beddelkeeda sii waddo qandaraaska adeegyada booliska, waxay sii wadi doontaa qiimeynta shuruudaha qandaraaska ee mustaqbalka, heerarka adeegga iyo kharashaadka la xiriira.

(Macluumaadkaan waxaa bixiyay: Sarah Skroch, Diiwaanhayaha Magaalada)

Qodobka Loo Codeynaayo 26-269

Waaxda Biyaha Burlington (Burlington Water District)

Canshuurta Dowlad Hoosaadka ee Shanta Sano ah oo Aftida ugu Bannaan
Dadwaynaha ee Hawlaha Dab-demiska & Ambalaaska

SU'AAL:

Waaxdu ma soo rogaysaa canshuur cusub oo shan sano ah oo dhan \$1.70 halkii \$1000 ee qiimaha la qiimeeyay, muddo shan sano ah oo bilaabanaysa 2027-2028? Qodobkan loo codeynaayo wuxuu abuurayaa canshuuro cusub oo maxalli ah oo aftida ugu bannaan dadweynaha, kuwaas oo keeni kara in canshuuraha hantida maguurtada ahi ay kordhaan in ka badan boqolkiiba saddex.

DULMAR:

Canshuuraha waxaa loo isticmaali doonaa bixinta kharashaadka ay Waaxda Biyaha Burlington (Burlington Water District) ku bixiso adeegyada gurmada degdegga ah (Dab-demiska iyo Ambalaaska), iyo ilaalinta sanduuq kayd ah oo loogu talagalay kharashaadka kordhaya ee mustaqbalka.

Qiyaasta wadarta lacagta la ururinayo sannad-maaliyadeed kasta waa:

\$84,420 sannadka 2027-2028
\$86,953 sannadka 2028-2029
\$89,561 sannadka 2029-2030
\$92,248 sannadka 2030-2031
\$95,016 sannadka 2031-2032

Qiiimaha canshuurta ee lagu qiyaasay qodobkan loo codeynaayo waa QIYAAS KALIYA oo ku saleysan xogta ugu fiican ee laga heli karo qiimeeyaha degmada xilligii qiyaasta la sameeyay, waxaana laga yaabaa inuu ka tarjumayo saamaynta dhimista lacag-bixinta hore, canshuur dhimista iyo heerka ururinta. Hanti leh qiime la qiimeeyay oo ah \$166,000.00, oo ah celceliska qiimaha la qiimeeyay ee degmada, waxay bixin doontaa qiyaastii \$24 bishii oo ah canshuurta hantida maguurtada ah oo dheeraad ah.

Bayaanka Sharaxaada ah

Maadaama aad ku nooshahay Waaxda Biyaha Burlington (Burlington Water District), adeegyada gurmada degdegga ah (dab-demiska iyo ambalaaska) ee adiga, qoyskaaga iyo hantidaada waxay ka yimaadaan Waaxda Dab-demiska & Gurmada Magaalada Portland (City of Portland Fire & Rescue Bureau) iyadoo loo marayo heshiis ay la gashay Waaxda. Adeegyadaas dab-demiska iyo ambalaaska waxaa lagu bixiyaa dakhliga canshuurta ee ka soo baxa hantida ku dhex taal xuduudaha Waaxda.

Galalka Xogta Codbixiyaasha Degmada Multnomah oo Ku qoran af Soomaali

Kharashaadka adeegyada gurmada degdegga ah ee ka jira Waaxda ayaa u kordhay si ka dhakhso badan dakhliga ka soo gala canshuurta hantida maguurtada ah.

Kharashaadka adeegyada gurmada degdegga ahi waxay afartii sano ee la soo dhaafay kordheen boqolkiiba 10 sannadkii, taas oo ku dhow laba jibbaar celceliska kororka canshuurta hantida maguurtada ah ee aad bixiso. Waaxdu ma laha ilo maalgelin oo aan ahayn dakhliga canshuurta hantida maguurtada ah si ay ugu bixiso adeegyada gurmada degdegga ah. Haddii la ansixiyo, qodobkan loo codeynaayo wuxuu oggolaanayaa canshuur dheeraad ah oo ah \$1.70 halkii \$1,000 ee qiimaha la qiimeeyay si loogu daboolo kharashaadkaas sii kordhaya ee adeegyada gurmada degdegga ah. Codsigan canshuurtu wax saamayn ah kuma yeelanayo hawsha aasaasiga ah ee Waaxda ee bixinta biyaha, mana saamaynayo qiimayaasha ay Waaxdu biyaha ka qaaddo.

Ansixinta canshuurtu waxay kaabi doontaa qiimaha joogtada ah ee hadda jira oo ah \$3.4269, waxayna ururin doontaa celcelis lagu qiyaasay \$87,029 sannadkii muddo shan sano ah. Celceliska qiimaha la qiimeeyay ee hanti ku taal degmada canshuuraha laga qaado waa \$166,000. Hanti leh qiimahaas celceliska ah, kharashka billaha ah ee hadda lagu bixiyo adeegyada gurmada degdegga ah waa \$47. Hantida celceliska ah, canshuurta la codsaday waxay ku dari doontaa \$24 bishii, taas oo wadarta kharashka celceliska ah ka dhigaysa \$71 bishii. Qiimayaasha dhexdhexaadka ah ee hantidu way ka hooseeyaan celceliska. Qiimaha la soo jeediyay wuxuu canshuurta hantida maguurtada ah ku kordhin doonaa \$11 hantida qiimaheedu dhexdhexaadka yahay ee leh qiime la qiimeeyay oo ah \$77,000.

Canshuurahan waxaa ururisa Degmada Multnomah, loomana isticmaali karo wax aan ka ahayn adeegyada gurmada degdegga ah ee Waaxda Biyaha Burlington (Burlington Water District).

(Macluumaadkan waxaa bixiyay: Richard T. Lovett, Guddoomiyaha Guddiga)

Qodobka Loo Codeynaayo 26-268 Degmo Dugsiyeedka Reynolds Lambarka 7 (Reynolds School District No. 7)

Debaajiyada Lagu Kordhinayo Badbaadada, Ammaanka; Lagu Dayactirayo, Laguna Dhisayo Dugsiyada; Lagu Kordhinayo Helitaanka

SU'AAL:

Degmadu ma soo saaraysaa debaajiyo, oo la saadaalinayo inay joogteeyaan qiimaha canshuurta debaajiga ee 2026, si loo kordhiyo badbaadada, loo dayactiro loona beddelo dugsiyada gaboobay, loona kordhiyo helitaanka? Haddii debaajiyada la ansixiyo, waxaa laga bixin doonaa canshuuraha laga qaado hantida ama lahaanshaha hantida, kuwaas oo aan hoos iman xaddidaadaha qaybaha 11 iyo 11b, Qodobka 11 ee Dastuurka Oregon.

DULMAR:

Qodobkan loo codeynaayo waxaa la saadaalinayaa inuu joogteeyo qiimaha canshuurta debaajiga ee Degmada ee 2026 oo ah \$1.62 halkii \$1,000 ee qiimaha la qiimeeyay.

Haddii la ansixiyo, Degmadu waxay heli doontaa \$8,168,000 oo ah maalgelin u dhiganta oo laga helo gobalka.

Degmo Dugsiyeedka Reynolds (Reynolds School District) waxay codsanaysaa in la ansixiyo debaajiyo qaddarkooda asalka ahi yahay \$162.5 milyan si loogu maalgeliyo kharashaadka raasamaalka, oo ay ku jiraan:

Beddel Dugsiga Hoose ee Glenfair (Glenfair Elementary) ee Gaboobay:

Beddel dugsiga 72 sano jirsaday, kaas oo ciriiri ah, leh nidaamyo dhisme oo aan la dayactiri karin, ay ku jiraan walxo halis ah, isla markaana leh tallaabooyin badbaado & ammaan oo duugoobay. Beddelidda ayaa lagu qiyaasay inay ka kharash yar tahay dib-u-habaynta.

Dayactir Kaabayaasha Cilladaysan:

- Saqafyada, HVAC, tuubooyinka biyaha, nidaamyada korontada iyo beddelidda kuleyliyaasha biyaha ee degmada oo dhan.

Badbaadada & Ammaanka:

- Nidaamyada digniinta dabka ee cusub, nidaamyada PA iyo ammaanka hareeraha ee degmada oo dhan.

Helitaanka:

Galalka Xogta Codbixiyaasha Degmada Multnomah oo Ku qoran af Soomaali

- Casriyeynta ADA, oo ay ku jiraan baarkinno la heli karo, waddooyinka lugta iyo meelaha laga fuulo ee degmada oo dhan.

Mashaariic Dheeraad ah:

- Garoon caws macmal ah oo cusub iyo kuraasta daawadayaasha oo laga sameynayo Dugsiga Sare ee Reynolds (Reynolds High School).

Waxay u baahan tahay guddi kormeer bulsho, isla xisaabtan joogto ah.

Maaliyadda

- Debaajiyada waxaa loo soo saari karaa taxanayaal kala duwan, mid kastaana wuxuu ku bislaanayaa 21 sano gudahood laga bilaabo maalinta la soo saaro.
- Wax kordhin ah lagama filayo qiimaha canshuurta debaajiga ee 2026 oo ah \$1.62 halkii \$1,000 ee qiimaha la qiimeeyay.
- Qiimaha dhabta ah ee canshuurta debaajigu wuu kala duwanaan karaa sababo la xiriira heerarka dulsaarka iyo isbeddellada qiimaha hantida.

Bayaanka Sharaxaada ah

Degmo Dugsiyeedka Reynolds (Reynolds School District) waxay u adeegtaa in ka badan 9,000 oo arday oo dhigta 16 dugsi oo ku kala yaal Fairview, Troutdale, Wood Village, iyo qaybo ka mid ah Gresham iyo Portland.

SII WADISTA MAALGASHIGA BULSHADA EE DUGSIYADA

Qodobkan debaajigu waa qayb ka mid ah dadaalka socda ee Degmadu ugu jirto in dugsiyada ardayda iyo shaqaalaha Reynolds ay noqdaan kuwo badbaado leh, ammaan ah, oo si wanaagsan loo dayactiray.

WAXAA LA SAADAALINAYAA IN LA JOOGTEEYO QIIMAHA CANSHUURTA DEBAAJIGA EE HADDA JIRA

Qodobkan loo codeynaayo waxaa la saadaalinayaa inuu joogteeyo qiimaha canshuurta debaajiga ee Degmada ee 2026 oo ah \$1.62 halkii \$1,000 ee qiimaha la qiimeeyay, iyada oo aan wax kordhin ah la filayn.

WAXAY XAQIJJINAYSAA MAALGELINTA U DHIGANTA

Intaa waxaa dheer, Degmadu waxay heli doontaa \$8,168,000 oo ah maalgelin u dhiganta oo laga helo gobalka, taas oo loo marayo Barnaamijka Iswaafajinta Horumarinta Raasamaalka Dugsiyada Oregon (Oregon School Capital Improvement Match Program), laakiin keliya haddii qodobka debaajiga la ansixiyo.

DUGSIYADA REYNOLDS WAXAY WAJAHAYAAN CAQABADO

Galalka Xogta Codbixiyaasha Degmada Multnomah oo Ku qoran af Soomaali

- **Dhismayaasha Dugsiyada ee Gaboobay:** Dugsiyada Degmo Dugsiyeedka Reynolds (Reynolds School District) waa kuwo gaboobay, waxayna leeyihiin nidaamyo HVAC, tuubooyin iyo koronto oo duugoobay iyo saqafyo degmada oo dhan ku yaal oo sii burburaya.
- **Dugsiga Hoose ee Glenfair (Glenfair Elementary):** Dugsigan 72 sano jirsaday wuxuu leeyahay caqabado waaweyn oo la xiriira dhismaha, nidaamyada farsamada iyo ammaanka, qaybo badan oo dhismaha ka mid ahna waa ciriiri. Helitaanka tas-hiilaadka aasaasiga ahi waa xaddidan yahay; tusaale ahaan hal musqul oo keliya ayaa u adeegta 270 arday.
- **Badbaadada iyo Ammaanka:** Dhowr ka mid ah nidaamyada digniinta dabka ee ku yaal Degmada waxay u baahan yihiin in la beddelo si ardayda iyo shaqaaluhu ammaan u ahaadaan.
- **Helitaanka:** Xarumo badan oo dugsiyada ah ayaa u baahan casriyeynta helitaanka ADA ee ardayda, shaqaalaha iyo booqdayaasha.

SOO-JEEDINTA DEBAAJIGA EE 2026

Degmo Dugsiyeedka Reynolds (Reynolds School District) waxay diyaarisay soo-jeedin debaaji si wax looga qabto baahiyahan xarumaha. Sharci ahaan, lacagta debaajiga waxaa loo isticmaali karaa oo keliya kharashaadka raasamaalka, loomana isticmaali karo kharashaadka hawlgalka caadiga ah. Haddii la ansixiyo, debaajiga waxaa la filayaa inuu maalgeliyo:

Beddel Dugsiga Hoose ee Glenfair (Glenfair Elementary) ee Gaboobay:

- Beddel dugsiga 72 sano jirsaday, kaas oo ciriiri ah, ay ku jiraan walxo halis ah, isla markaana leh nidaamyo dhisme iyo ammaan oo aan la dayactiri karin; beddelidda ayaa lagu qiyaasay inay ka kharash yar tahay dib-u-habaynta

Dayactir Kaabayaasha Cilladaysan:

- Saqafyada, nidaamyada HVAC, tuubooyinka biyaha iyo nidaamyada korontada, iyo beddelidda kuleyliyayaasha biyaha ee degmada oo dhan

Badbaadada & Ammaanka:

- Nidaamyada digniinta dabka ee cusub, nidaamyada PA iyo horumarinta ammaanka hareeraha

Helitaanka:

Galalka Xogta Codbixiyaasha Degmada Multnomah oo Ku qoran af Soomaali

- Casriyeynta ADA oo ay ku jiraan baarkinno la heli karo, waddooyinka lugta iyo meelaha laga fuulo ee degmada oo dhan

Mashaariic Dheeraad ah:

- Garoon caws macmal ah oo cusub iyo kuraasta daawadayaasha oo laga sameynayo Dugsiga Sare ee Reynolds (Reynolds High School)
- Dib-u-habaynta musqulaha Dugsiga Sare & Dugsiyada Dhexe
- Sagxadda hadda roogga leh ee Qolka Jimicsiga Sweetbriar (Sweetbriar gym) ku beddel sagxad casri ah oo sahlan in la nadiifiyo

KORMEERKA IYO ISLA XISAABTANKA

Guddi kormeer bulsho ayaa la socon doona kharashaadka debaajiga oo samayn doona isla xisaabtan joogto ah si loo hubiyo in lacagaha loo isticmaalo oo keliya mashaariicda ay codbixiyayaashu ansixiyeen.

MAALIYADDA

Debaajiyada waxaa loo soo saari karaa taxanayaal kala duwan, mid kastaana wuxuu ku bislaanayaa 21 sano gudahood laga bilaabo maalinta la soo saaro.

Qodobkan loo codeynaayo waxaa la saadaalinayaa inuu joogteeyo qiimaha canshuurta debaajiga ee Degmada ee 2026 oo ah \$1.62 halkii \$1,000 ee qiimaha la qiimeeyay, iyada oo aan wax kordhin ah la filayn.

Qiimaha dhabta ah ee canshuurta debaajigu wuu kala duwanaan karaa sababo la xiriira heerarka dulsaarka iyo isbeddellada qiimaha hantida.

MACLUUMAAD DHEERAAD AH

Fadlan booqo ReynoldsSchoolBond.org si aad wax badan uga ogaato.

(Macluumaadkan waxaa bixiyay: Frank Caropelo, Maamulaha Guud)